

Adeegga Tarjumaadda

Waxaa aan tarjumnaa wax kasta oo qoran sida:

- Ruqsada gaadhi waddida
- Shahaadooyinka dhalashada, guurka ama furriinka
- Baasaboorada
- Shahaadooyinka waxbarashada
- Tilmaamaha farsamada
- Warqadda Asluubta Wanaagsan
- Xayeysiiska qoran ama ka Internetka ah
- Waraaqaha shaqada iyo shaqaalah la xidhiidha (sida macluumaadka shaqaalah loogu talagalay)
- Buug gacmeedka iyo habraaca shirkadda
- Macluumaadka daryeelka bukaanka

Dukumintiga aan tarjumno oo dhan waxaan ku lifaaqnaa waraaqda dhaarta tarjumaha.

Dhaariye sharchiyeysan ayaa xaqijiya waraaqaha dhaarta. Waraaqaha dhaartu waa rasmi, waxaana sixiixa dhaariye ka sharchiyeysan gobolkaaga. Qofka codsanaya tarjumaadda ayaa laga rabaa in uu hubiyo in dhaariye uu lagama maarmaan yahay. Ma soo celino kharashka ku baxay tarjumaadda haddii dhaarta aan la aqbalin.

Sidee ayaad ducumentiga noogu soo gudbin kartaa?

- Waxaa aan kaa doonaynaa dukumintiga asalka ah. In kasta oo aad dukumintiga email ahaan noogu soo diri karto, haddii aad xafiiska noogu keento nuqulka asalka ah waanu aqbalaynaa. Nuql ayaanu kaaga bixin kaa oo aad qaadan karto.
Dukumintigaaga E-mail ahaan ku soo dir: cis@the-family-centre.com
ama
Keen xafiiskanaga: #20, 9912- 106 Street, Edmonton, AB

Waa in aad na siiso macluumaadkan soo socda marka aad dukumintigaaga noo keento:

- Luuqadda loo tarjumayo
- Taariikhda loo baahan yahay

Afartan iyo siddeed (48) sacadood gudahood ayaanu kuugu sheegynaa ajuurada tarjumaadda kaagaga baxaysa, tarjumaaddana waxaanu bilaabaynaa marka aad ajuurada bixiso ka dib.

- Ajuurada tarjumaaddu waxay ku xidhan tahay luuqadda dukumintiga loo tarjumayo, nooca dukumintiga, eraybixinta, xilligga loo baahan yahay iyo qaabaynta. Fadlan nala soo xidhiidh si aan ajuurada kuugu sheegno. Qiimaynta ajuuradu waxay shaqaynaysaa lix (6) billood oo kaliya. Lix (6) billood ka dib waxaad u baahanaysaa qiimeyn cusub.
- Ajuuradu gorgoro ma leh. Waxaa aan tarjumaadda bilownaa ka dib marka aad bixiso ajuurada.
- Ajuurada tarjumaadda waxa aad ku bixin kartaa caddaan, kaadhka bangiga ama kaadhka amaahda (credit card). Taleefan waad ku bixin kartaa haddii aad isticmaalayso kaadhka amaahda. Rasiid ayaanu ku siinaynnaa marka aad bixiso ajuurada ka dib.

